

# TILMAAMAHA

si aad u qaado muunadda saxarada ee baaritaanka  
kansarka mindhicirka



## Xirmada tuyuubka shaybaarka waxay ka kooban tahay kuwa soo socda:


- Tuyuubka shaybaarka
- Sumadda tuyuubka shaybaarka oo leh magacaaga, lambarka CPR-ka iyo barkoodka. Tani waxay ku lifaaqan tahay warqadaada casuumaadda.
- Tilmaamaha (dukumiintiga hadda jira)
- Waraaqda ururinta ama qaadista oo calaamadaysan "OPSAMLINGSPAPIR"
- Baqshadda soo celinta oo shaabadaysan

## MUHIIM


Ku dheji sumadda magacaaga leh, lambarka CPR-ka iyo barkoodka tuyuubka shaybaarka.

Tuyuubyada aan sumadda lahayn waa la tuuri doonaa.


Dumarku waa inaysan qaadan muunad inta lagu jiro xilliga caadada.



Sumadda leh magacaaga, lambarka CPR-ka iyo barkoodka ayaa ku lifaaqan warqadaada casuumaadda, oo ka hooseysa falaarta cas.




Ku dheji sumadda lambarkaaga CPR-ka iyo magaca si toos ah tuyuubka shaybaarka.




Sumadda saxda ah ee lagu dhejiyay oo leh barkoodka.



Kor u qaad daboolka fadhiga musqusha ka hor intaadan saarin waraaqda ururinta. Ku tirtir fadhiga musqusha waraaqda tiishka ah.




Kala bixi waraaqda ururinta. Ka fuji koolada ilaalinta dhinac ka mid ah warqadda oo ku dheji xaashida dhinaca dambe ee fadhiga musqusha




6 Ka fuji koolada ilaalinta dhinaca kale ee warqadda ururinta oo ku dheji dhinaca kale ee fadhiga.




7 Waxaa muhiim ah in waraaqda ururinta ay u sameysanto baquli ama weel yar camal. Hoos u dhiig fadhiga musqusha.




8 U saxarood sida caadiga ah. Iska ilaali inaad ku kaadiso saxarada ama waraaqda ururinta.




9 Wareeji daboolka cagaaran ee tuyuubka shaybaarka oo kor u qaad. Usha cagaaran oo shaybaarka ayaa ku dhagan daboolka. Tuyuubka waxaa ku jira dareere oo ay tahay inuu ku sii jiro tuyuubka.




10 Ku ururi muunadda oogada, adoo ugu xoqaya usha saxarooda muunadda gadaal iyo horeyba. Usha ha gelinin, saxarada gudaheeda.



11 Ku celceli sidaan ilaa dhammaan giraangiraha ey daboolomaan. Laakiin, adiga oo rali ah, ha ku badin saxarada usha muunadda.




Ku celi usha muunadda dib tuyuubka shaybaarka oo riix ilaa aad ka maqasho dhawaaqa "isku dhagsita".




Ka saar waraaqda ururinta fadhiga musqusha oo biyo raaci 2 ama 3 jeer adigoo isticmaalaya qulqulka biyaha oo buuxa.

**Fiiro gaar ah:** Waraaqda ururinta wey milmeysaa marka ay biyaha taabtaan.



Geli tuyuubka shaybaarka baqshadda soo celinta ee shaabadaysan. Fuji koolada si aad u xirto baqshadda.



Waxaa haboon, inaad soo celiso baqshadda tuyuubka shaybaarka ku jirto **isla maalintaas**.

Baqshadda waxaad ku soo diri kartaa goobaha adeegga boostada – tusaale ahaan dukaamada waaweyn, ama sanduuqa boostada.



EasySampler® Basic is produced by GP Medical Devices A/S - [www.GPMD.dk](http://www.GPMD.dk)



Copyright© 2023 GP Medical Devices A/S